# Warbixinta Sanadkii 2016-kiiee

# Wax qabadka Golaha Wakiilada

Sanadka 2016ka Golaha Wakiiladu wuxuu yeeshay saddex kal-fadhi iyadoo Gudiyada Golaha isugeyn yeeshey 113 fadhi, sidaa darteed Warbixintani waxay xambaarsan tahey wax qabadkii sanadkaas oo ka kooban Mashaariicda Sharci ee Goluhu ka doodey, kuwa uu ansixiyay, Masuuliyiinta Qaran ee uu Ansixiyay iyo kuwa Golweynaha iyo Gudiyaduba la kulmeen, Go'aamadii Goluhu gaadhey oo taariikheysan iyo Guud ahaan waxyaabihii sanadka u soo kordhay Golaha Wakiilada.

Warbixintani waxay xuseysa hawl kasta iyo dhacdo kasta iyadoo taariikheysan maalinta ay dhacdey iyo wixii ka soo baxay.

## 1. Kal-fadhiyadii Golaha ee 2016ka:-

| No. | Kal-fadhiga | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Kal-fadhigii 30aad | 19 March 2016 ilaa 16 May 2016 |
| 2. | Kal-fadhigii 31aad | 23 July 2016 ilaa 19 September 2016 |
| 3. | Kal-fadhigii 32aad | 05 November 2016 ilaa |

## 2. Fadhiyada ay Goleweynaha iyo Gudiyadu fadhiisteen:-

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Fadhiyada Goleweynuhu | 99 Fadhi |
| 2. | Fadhiyada Gudidda Joogta | 17 Fadhi |
| 3. | Fadhiyada Gudiyada kale | 96 Fadhi |
| | **Isugeyn** | **212 Fadhi** |

## 3. Mashaariicd Sharci (Xeerar) ee Goluhu ka dooday:-

| No | Xeerka | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Kastamada Somaliland | 04/04/2016 |
| 2. | Xeerka Hay'addaha Dakhliga iyo Cashuuraha | 20/04/2016 |
| 3. | Xeerka Maareynta iyo Maamulka Maaliyada | 23/04/2016 |
| 4. | Xeerka Gudidda Qandaraasyada Qaranka | 02/05/2016 |

| | | |
|---|---|---|
| 5. | Xeerka Hanti-dhowrka Guud ee Qaranka | 09/05/2016 |
| 6. | Xeerka Maydhista lacagaha | 18/12/2016 |

## Xeerarka Madaxweynaha u gudbey si uu dhaqan-galiyo:-

| No | Xeerka | Taariikhda | Loo Gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Xeerka Kastamada Somaliland | 09/04/2015 | Madaxweynaha |
| 2. | Xeerka Hay'adda Dakhliga iyo Cashuuraha | 12/04/2016 | Madaxweynaha |
| 3. | Wax ka badalka Xeerka Diinwaangalinta Codbixiyayaasha iyo Madaniga | 17/04/2016 | Madaxweynaha |
| 4. | Xeerka Maamulka Maaliyada Qaranka | 13/12/2016 | Madaxweynaha |
| 5. | Xeerka Hantidhowrka Guud ee Qaranka | 13/12/2016 | Madaxweynaha |
| | Wax ka badalka iyo kaabista Xeerka Doorashooyinka Madaxtooyada iyo G/Deegaanka | 03/01/2017 | Madaxweynaha |

## 4. Masuuliyiiinta Qaran ee Golaha hor-yimi:-

| No | Masuulka | Warbixinta | Taariikhda |
|---|---|---|---|
| 1. | | | |
| 2. | Warbixintii Heshiiska Shirkada DPWorld Xukuumadu kula gashey Dekada Berbera oo Golaha la horkeenay | Wasiirada Xukuumada | 06/08/2016 |
| 3. | | | |
| 4. | Wasiirka Wasaarada Maaliyada | Miisaniyada Qaranka ee Sanadka 2017ka | |

## 5. Ansixinta Masuuliyiinta Qaran:-

| **No.** | **Magaca iyo Xilka Masuulka la Ansixiyey** | **Xilka Masuulka** | **T/la ansixiyey** |
|---|---|---|---|
| 1. | Md. Xuseen Deyr | Wasiirka W. Ganacsiga iyo Maalgashiga | 15/05/2016 |
| 2. | Md. Maxamed Muuse Diiriye | Wasiiru Dawlaha Amniga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha | 15/05/2016 |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 3. | Md. Maxamuud Jaamac Warsame | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga | 15/05/2016 |
| 4. | Md. Naasir Aw Jeer | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha | 15/05/2016 |
| 5. | Md. Maxamuud Cabdi Xarbi | Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha | 15/05/2016 |
| 6. | Md. Maxamuud Jaamac Aadan Galaal | Wasiiru Dawlaha Wasaarada Qorsheynta | 17/05/2016 |
| 7. | Md. Mukhtaar Cisman Cabdi | Xubin Komishanka Maamul Wanaaga | 25/04/2016 |
| 8. | Md. Mukhtaar Yaasin Cali | Xubin Komishanka Mamaul Wanaaga | 25/04/2016 |
| 9. | Md. Axmed Jamac Maxamuud | Xubin Komishanka Mamaul Wanaaga | 25/04/2016 |
| 10. | Md. C/naasir C/laahi Axmed | Xubin Komishanka Mamaul Wanaaga | 25/04/2016 |
| 11. | Md. Yaasiin X. Max'ud Xiirey (Faratoon) | Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha | 19/11/2016 |
| 12. | Md. Farxan Aadam Haybe | Wasiirka W. Duulista iyo Hawada | 19/11/2016 |
| 13. | M. Yuusuf Axmed Faarax (Aflahaar) | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Cadaalada | 19/11/2016 |
| 14. | Md. Sharmarke Muxumed Geele | Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha | 19/11/2016 |
| 15. | Md. Guuleed Maxamed Jirde | Wasiir ku-xigeenka Duulista iyo Hawada | 17/12/2016 |
| 16. | Md. Maxamed Mixile Boqore | Wasiiru-dawlaha Arrimaha Dibada | 17/12/2016 |
| 17. | Md. C/waaxid C/raxman C/qaadir | Wasiiru-dawlaha Wasaarada Beeraha | 17/12/2016 |
| 18. | Md. Maxamed Axmed Aadan | Wasiiru-dawlaha Wasaarada Warfaafinta | 17/12/2016 |
| 19. | Md. Cali Axmed Maxamed (Dhegoole) | Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Maaliyada | 17/12/2016 |

## 6. Ansixinta Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee 2017ka:-

Dastuurka Qaranku wuxuu Golaha Wakiilada siiyay awooda in dhamaan wixii Maaliyad ku saabsan ay iyagu awood u leeyihiin ogolaansheheeda, jaangoynteeda, ansixinteeda iyo go'aaminteeda, halka Xukuumada iyo laamaha maaliyadeed uu dastuurku siiyay inay ugu shaqeeyaan sida Golaha Wakiiladu ku ansixiyo.

Sidaa darted, Wasaarada Maaliyadu waxay Sanadkasta markey soo diyaariso Odoroska Miisaaniyada lagu shaqeynayo ay u soo gudbisaa Golaha Wakiilada si ay sharciyeeyaan, Waxaaney Wasaaradu 26 December 2016 u soo gudbisey Golaha Wakiilada Odoroska Miisaaniyada Qaranka ee Sanadka 2017ka oo ka kooban Dakhli iyo Kharash isu dheeli tiran, waxayna Wasiirada Maaliyada Maaliyada Marwo. Zamzam Cabdi Aadan iyo Saraakiisha u sareysa sida Wasiir ku-xigeenka iyo Agaasimaha Guud ay Warbixin Golaha ka siiyeen Miisaaniyada 2017ka, intaa ka dibna wuxuu Gudoomiyuhu ku wargaliyay Gudidda Dhaqalaaha inay ka soo gudato waajibaadkeeda sharci, iyadoo Gudidda Dhaqaaluhu Golaha ka hor akhridey Warbixinta Miisaaniyada 31 December oo ay soo lafa-gureen kana soo shaqeeyeen isla markaana warbixin xambaarsan soo jeedimo dhowr ah Golaha u soo gudbiyeen.

Intaa ka dib Fadhigii Golaha ee 02 January 2017 ayay Mudanayaasha qaar soo jeediyeen fadhigaas in Miisaaniyadaas la ansixiyo iyadoo laga doodin, halka Mudanayaal kale ku soo jeediyeen in laga doodo, waxaa loo kala codeeyay labadaas soo jeedimood ee kala ahaa in

Miisaaniyada aan laga doodin ee la ansixiyo iyo in laga doodo waxayna badida mudanayaashu u codeysey in iyadoon laga doodin la ansixyo.

Ka dib waxaa la galey codeynta, waxaana Golaha Wakiilada fadhiyay xildhibaano tiradoodu dhamayd 67 xildhibaan, waxaana ogolaaday in duuduub lagu ansixiyo 43 Mudane, halka 17 Mudane ay diidey kana aamuseen 6 Mudane Gudoomiyuhuna aanu ka codeyn sida caadada ah, sidaasna waxaa lagu ansixiyay Miisaaniyadd Sanadeedka 2017ka.

Guud ahaan Dakhliga Odoroska Miisaaniyadda 2017 ee Golaha Wakiiladu ansixiyay wuxuu ka koobanaa **2,175,104,355,662/=** una dhiganta Doolar ahaan **$362,517,393.**

## 7. Xeerarka Golaha horyaal ee Qabyada ah:-

### A. Xeerarka Gudiyadu gacanta ku hayaan:-

| No. | Magaca Xeerka | Gudidda gacanta ku heysa |
|---|---|---|
| 1. | Xeerka Shirkadaha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 2. | Xeerka Xawaaladaha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 3. | Xeerka Caymiska | Gudidda Dhaqaalaha |
| 4. | Xeerka Deegaanka (National Environmental Bill) | Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga |
| 5. | Xeerka Shidaalka | Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga |
| 6. | Xeerka Macdanta | Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga |
| 7. | Xeerka Maamulka Qashinka (Waste Management Bill) | Gudidda Deegaanka iyo Kheyraadka Dabiiciga |
| 8. | Xeerka Ciyaaraha | Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta |
| 9. | Xeerka Saxaafada | Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta |
| 10. | Xeerka ka hortaga Argagaxisada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 11. | Xeerka Doorashada Golaha Wakiilada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 12. | Xeerka Caasimada | Gudidda Arrimaha Gudaha |
| 13. | Xeerka Hay'adda Wadooyinka | Gudidda hawlaha Guud iyo Gaadiidka |
| 14. | Xeerka Gudidda Qandaraasyada | Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida |
| 15. | Xeerka Mideynta Cashuuraha | Gudidda Dhaqaalaha |
| 16. | Xeerka Shaqaalaha Dawlada Hoose | Gudidda Arrimaha Bulshada |
| 17. | Xeerka Low of Establishment of Somaliland Agency | Gudidda Dhaqaalaha |
| 18. | Waxa ka badalka iyo kaabista Xeerka Ciqaabta Guud | Gudidda Cadaalada, Garsoorka iyo X. Insaanka |
| 19. | Xeerka Doorashooyinka G. Deegaanka iyo M/tooyada | Gudidda Arrimaha Gudaha |

### B. Xeerarka Golaha Weynaha Horyaal:-

| | | |
|---|---|---|
| 20. | Xeerka Waxbarashada | Akhriskii labad |
| 21. | Xeerka Kufsiga | Akhriskii labad |

| | | |
|---|---|---|
| 22. | Xeerka Hawlaha Ganacsiga Baananka | Akhriskii labaad |
| 23. | Xeerka Maydhista Lacagta | Akhriski labaad |
| 24. | Xeerka Booliiska | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |
| 25. | Xeerka Gudidda Dib U-habeynta Shuruucda | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |
| 26. | Xeerka Xabsiyada | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |
| 27. | Xeerka Hay'adda Duulista Hawada | (Madaxtoyada ka soo noqdey) |

## 8. Go'aamada Goluhu Gaadhey:-

### Go'aanadii 2016kii

| No. | Go'aanka | Taariikhda la gaadhey | Halka loo gudbiyay |
|---|---|---|---|
| 1. | Goaanka Ansixinta Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumada Iyo Haya'daha Madaxa Banana Xr/Ir/71/2015 | **29/09/2016** | Madaxweynaha |
| 2. | Soo Gudbin Goaanka Ansixinta Xeerka Duulista Iyo Hawada Xeer/Lr/70/2015 | **12/01/2016** | Madaxweynaha |
| 3. | Goaanka W/Wasaarada Qorshaynta Qaranka Iyo Horumarinta Md:Cali Xuseen Ismail Jirde (Cali Shoombe) | **19/12/2015** | Madaxweynaha |
| 4. | Goaanka Ansixinta Wasiir Kuxigeenka W/ Gaashandhiga Md:Boos Mire Maxamed | **19/12/2015** | Madaxweynaha |
| 5. | Goaanka Ansixinta Wasiir Ku Xigeenka W/Ganacsiga Iyo Maalgashiga Caalimiga Ah Ee Jsl Md: Kaysar Cabdilaahi Maxamed | **19/12/2015** | Madaxweynaha |
| 6. | Gooanka Ansixinta W/Wasaarada Hawlaha Guud, Guriyanta Iyo Gaadiidka Md:Cali Xasan Maxamed (Cali Mareexaan) | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 7. | Goaanka Ansixinta Wasiir Kuxigeeenka W/Qorshaynta Qaranka Md:Cabdi Yuusuf Ismail (Cabdi Wadaad) | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 8. | Goaanka Ansixinta W/Kuxigeenka W/Arimaha Dibada Md:Axmed Aadan Ismail | **19/112/2016** | Madaxweynaha |
| 9. | **Goaanka ansixinta w/wasaarada waxbarashada Md: c/laahi** | **19/12/2016** | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | **ibraahim habane (c/laahi dheere)** | | |
| 10. | Goaanka ansixinta wasiiru dawlaha w/macdanta iyo biyaha Md:c/raxmaan ahmed ismail | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 11. | Goaanka ansixinta wasiiru dawlaha w/xanaanada xoolaha Md: c/rashiid maxamed cali | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 12. | Goaanka wasiir ku xigeenka w/ dib u dejinta ee jsl Md: aadan c/laahi cabdile | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 13. | Goaanka ansixanta w/ciyaaraha dhalinyarada iyo dhaqnka Md: clahi farax maydhane | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 14. | Goaanka w/ kuxigeenka w/hawlaha guud Md: cabdi maxamed hirad | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 15. | Goaanka ansixinta w/kuxigeenka w/caadalada iyo arimaha garsoorka Md: cismaan | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 16. | Goaanka ansixinta w/ dawlaha w/macdanta iyo biyaha Md: mahdi cisman buuri | **19/12/2016** | Madaxweynaha |
| 17. | **Goaanka ansixinta ajandaha kal-fadhiga 30aad ee caadiga ah** | **26/03/2016** | Shir-gudoonka |
| 18. | Goaanka ansixinta wax ka badelka kaabista lifaaqa 1aad ee xr.diwaangelinta codbixayayaasha xr.37/2007 | **17/04/2016** | Golaha Guurtida |
| 19. | Goaanka ansixinta cusboonaynsiinta mudada diwaangelinta iyo ansixinta asxaabta qaranka | **25/04/2016** | Madaxweynaha |
| 20. | Goaanka ansixinta xilalka xubnaha komishanka maamul wanaaga | **25/04/2016** | Madaxweynaha |
| 21. | Goaanka ansixinta soo jeedinta wax kabadallka iyo kaabista xr.codbixiyayaasha | **30/04/2016** | Madaxweynaha |
| 22. | Goaanka ansixinta xeerka kastamada xr.lr.73 | **09/04/2016** | Madaxweynaha |
| 23. | Goaanka ansixinta xeerka dakhliga xr.lr.72 | **20/04/2016** | Madaxweynaha |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 24. | Goaanka ansixinta diidmada xeerka qandaraasyada qaranka | **07/05/2016** | Gudidii keentey |
| 25. | **Goaanka ansixinta w/waasarada ganacsiga iyo maalgashiga Md: xuseen aadan cige (dayr)** | **15/05/2016** | Madaxweynaha |
| 26. | Goaanka ansixinta w/dawlaha w/qorshaynta qaranka Md: maxamed aadan jaamac | **16/05/2016** | Madaxweynaha |
| 27. | Goaanka ansixinta gudoomiye ku xigeenka haya'da shaqaalaha dawlada Md: maxamed c/lahi xarbi | **15/05/2016** | Madaxweynaha |
| 28. | Goaanka ansixinta wasiir ku xigeenka w/waasarada gaashandhiga Md: maxamuud warsame jaamac | **15/05/2016** | Madaxweynaha |
| 29. | Goaanka ansixinta wasiir ku xigeenka w/xidhidhka golayaasha Md: maxamedd muuse diiriye | **15/05/2016** | Madaxweynaha |
| 30. | Goaanka ansixinta wasiiru dawlaha amniga ee w/arimaha gudaha Md: maxamed muuse diiriye | **15/05/2016** | Madaxweynaha |
| 31. | Goaanka Ansixinta Ajendaha Kal-fadhigii 31aad | | Shir-gudoonka |
| 32. | Goaanka ansixinta heshiiska maalgashiga dekada berbera | **09/08/2016** | Madaxweynaha |
| 33. | **Goaan gole: Canbareyn Urur Gobeleedka IGAD** | **17/09/2016** | Madaxweynaha |
| 34. | Goaanka kala qaadista doorashada golaha wakiilada iyo madaxtooyada | **17/09/2016** | Madaxweynaha |
| 35. | Goaanka ansixinta miisaniyada dawlada 2017ka | **02/01/2017** | Madaxweynaha |
| 36. | Goaanka ansixinta wax kabedelka M/tooyada iyo G/deeganka lifaaqa 6aad (xr.20/2001) | **03/01/2017** | Golaha Guurtida |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 37. | Goaanka ansixinta wax kabedelka M/tooyada iyo G/deeganka lifaaqa 6aad | **08/01/2017** | Madaxweynaha |
| 38. | Goaanka ansixinta xeerka hanti dhowrka ee qaranka | **13/12/2016** | Madaxweynaha |
| 39. | Goaanka ansixinta xeerka maamuska Madaxweynaha | **13/12/2016** | Madaxweynaha |

## 9. Fadhiyada Wadajirtka iyo Khudbad Sanadeedkii Madaxweynah:-

Labada Gole waxay Fadhi oo wada-jir ah oo Mudanayaasha labada Gole ku dhageysteen Khudbad Sanadeedkii Madaxweynaha ee sanadka 2016ka, Fadhigaas oo ahaa 11/01/2016, Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland **Md. Axmed Maxamed Maxamuud Siilaanyo** Wuxuu fadhigaa ka jeediyay Khudbad dhinacyo badan taabaneysa oo u badan wax qabadkii Xukuumada sandkii 2015ka iyo wixii ka dambeysay.



Waxyaabaha khudbadu ka koobneyd waxaa ka mid ahaa:-

- Siyaasadda Arrimaha Dibedda.
- Wada-hadallada Somaliland iyo Soomaaliya.
- Diiwaangelinta iyo Doorashooyinka.
- Qiima-dhaca Shillinka Somaliland.
- Adkaynta Nabadgelyada.
- Maamul Wanaagga.
- Garsoorka iyo Cadaaladda.

- Siyaasadda Arrimaha Dibadda

## 10. Mooshinada Sanadka 2015ka Golaha la horkeenay:-

| No. | Ujeedada Mooshinka | Taariikhda |
|---|---|---|
| 1. | Mooshin ku saabsan Xeerka Ganacsiga Baananka | 10/01/2016 |
| 2. | | |
| 3. | | |
| 4. | Mooshin ku saabsan Kalumeysiga iyo Kheyraadka Bada | |

## 11. Ansixintii Heshiiska Xukuumadu la gashey Shirkada DP World:-

06/08/2016 ayay Xukuumadu Golaha Wakiilada hor keentay Heshiiskii Hordhaca ahaa ee ay la gaadhay Kambaniga DP World, Waxaana Golaha horyimi Raxan wasiiro ah oo uu Horkacayay Wasiirka wasaarada Arimaha Debeda kuna wehelinayeen wasiirka wasaarada Maaliyada, wasiirka wasaarada Madaxtooyada, wasiirka wasaarada qorshaynta, wasiirka wasaarada Hawlaha Guud, Maareeyaha Dekeda Berbera, Safiirka Somaliland u Fadhiya Imaaraadka carabta iyo la taliyayaal ka caawinayay heshiiskan dawlada Somaliland.

Heshiiskan ama Nuqulka qoraalada Rasmiga ah ee ay Dawlada iyo DP World isku afgarteen ayaa loo qaybiyey Mudanayaasha aqalka Wakiilada, waxaana warbixin ka jeediyey wasiirka wasaarada Arimaha Debeda iyo wasiirka Madaxtooyada iyo Wasiirka Maaliyada.Mudanayaasha Golaha ayaa qaar ka mid ahi waxay su'aalo ka waydiiyeen heshiiska iyo qodobada uu ka kooban yahay isla markaana waxay xildhibaanada qaar dhaliileen qoraalada ay Xukuumadu horkeentay Golaha oo aan ahayn heshiiskii sharciga ahaa.



Intaa ka dib wuxuu Goluhu doodey dheer ka yeeshay Heshiskaas 08/08/2016 iyadoo ay doodaas ka qeyb-galeen 12 Mudane, dooda ka dibna markii la isku soo ururiyay afkaartii Mudanayaashu soo jeediyeen waxaa ka soo baxay laba qodob oo kala ahaa:-

- **In aanu heshiiskani aheyn kii saxda ahaa markaa dib loo celiyo lana keeno kii saxdaa ahaa Golaha Wakiilada iyo**
- **In Heshiiska Xukuumadu keentay sidiisa lagu ansixiyo**

Waxaana cod loo qaadey labadaa qodob fadhigii xigey ee 09/08/2016, iyadoo Golaha ay fadhiyeen 74 Mudane waxaa ogolaadey 69 mudane, waxaa diidey 4 mudane Gudoomiyuhuna muu codeyn sidaasna wuxuu Golaha Wakiiladu ku ansixiyo in Xukuumadu gasho Heshiiska Dekada Berbera lagu maalgalinayo ee Somaliland la gashey Shirkada Dalka Imaaraadka Carabta laga leeyahey ee DP World.

## 12. Ansixintii Go’aanka M/weynaha ee kala qaadista 2 doorasho:-

Intii lagu jirey kal-fadhigan 31[aad] waxa Madaxweynuhu Golaha u soo gudbiyay Go’aan uu ka soo saarey arrinta Saami-qeybisga kuraasta Golaha Wakiilada ee Gobolada dalka, waxaa heshiiskaa golaha la hor akhriyay go’aankaas 17/09/2016, wuxuuna Goluhu heshiiskaas ku ansixiyay cod aqlabiyad ah iyadoo ay ka soo xaadireen fadhigaas 59 Muddane ayaa waxaa ogolaadey go’aankaas Madaxweynuhu gaadhey 52 Muddane, halka ay diideen 5 Xildhibaan.

Sidaas wuxuu Goluhu ku meel mariyay heshiis iyadoo la kala qaadey labada doorasho ee Madaxtooyada iyo Golaha Wakiilada oo dib lo dhigay Doorashada Golaha Wakiilada waxaana go'aankaas loo gudbiyay maxkamadda Sare, isla markaana muddo-kordhin loo samayn doonaa Golaha Wakiilada taas oo muddada ay noqon doonto go’aanka ay ka gaadhi doonan Golaha Guurtidu.

## 13. Gudidda Ururada/Axsaabta Siyaasada ayaa Mudadii loo kordhiyay:-

Madaxweynaha Jamhuuriyada Somaliland Golaha u soo gudbiyay in Mudada loo kordhiyo Gudidda Ururada iyo Axsaabta Siyaasada oo wakhtigoodii dhamaadey, wuxuuna soo jeediyay in 2 sano oo dambe xilka loo kordhiyo.

**25/04/2016** fadhigii 17[aad] ee Kal-fadhiga 30[aad]ayaa Golaha Wakiiladu cod u qaadeen mudo u kordhinta Gudidda Ururada iyo Axsaabta Siyaaasda Qaranka, fadhigaas oo ay ka soo xaadireen Golaha 47 Mudane, waxaa Cod aqlabiyada ah oo gacanta taag ah 44 Mudane ogolaadeen Soo jeedinta Madaxweynaha ee mudo kordhintaas, sidaas ayuuna Golaha Wakiiladu isagoo ansixiyay soo jeedintii Madaxweynaha uu Mudo Xileedka ugu kordhiyay Gudidda Ururada iyo Axsaabta Siyaaasda Qaranka.

## 14. Waxqabadaka Gudiyada Golaha:-

### Gudidda Joogtada iyo Anshaxa

Gudiddu waxay Golaha u soo gudbisey ka dib markii ay ka soo tala-bixisay inuu Xilka Madaxweynuhu u magacaabey u qalmo sidaa darteed ansixiyo **Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Xidhiidhka Golayaasha iyo Cilmi Baadhista Md. Naasir Aw Jeer.**

Gudidda Joogtadu iyadoo ah gudidda matasha xiliga fadhiyada Goluhu fasaxa yihiin waxay kulamo la yeelatey Masuuliyiin badan oo ka kala tirsan Wasaaradaha iyo Hay'addaha kala duwan ee Dawlada, iyadoo warbixin ka soo diyaarisey dhamaan waxqabadkii Gudidda, Masuuliyiinta ay la kulantey waxaana ka mid ahaa:-

1. Wasaaradda Xanaanada Xoolaha
2. Wasaaradda Duulista Iyo Hawada
3. Ururka Wershadlayda Dalka (NIA) Gaar Ahaan Warshadaha Yaryar Ee Biyaha Iyo Sharaabka Soo Saara.

**Waxa kulamadan xog waraysi hawlo shaqo ah kaga maqnaa:-**

1. Wasaarada Arimaha Dibeda
2. Wasaarada Maaliyada
3. Maareeyaha Dekeda Berbera
4. Wasaarada Arrimaha Gudaha

**Waxa kulamadan xog waraysi kaga maqnaa sabab la'aan:-**

1. Maayirka Caasimada Hargaysa

### Gudidda Ilaalilnta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

Gudiddu waxay Kal-fadhigii 30$^{aad}$ Golaha u soo gudbisey laba Xeer oo ay gacanta ku heysayoo kala ahaa Xeerka Hanti-dhowrka Qaranka iyo Xeerka Hay'adda Qandaraasyada, labadaas Xeer oo ka mid ahaa 5tii Xeer ee PFM-ka, Gudiddu waxay u soo qabatey kulamo dadweyne iyadoo waliba Kuliyada Sharciga ee Jaamacadaha dalka kulamo kala soo yeelatey, waxayna ugu dambeyna ku soo sameysay lifaaq wax ka badal iyo kaabis ah oo uu Golaha ka hor akhriyay Gudoomiyaha Gudiddaas Md. Ibraahim Axmed Heybe.

### Gudidda Dhaqaalaha, Ganacsiga iyo Maaliyada

Gudidda Dhaqaalaha, Maaliyada iyo Ganacsigu waxay Kal-fadhigii 30[aad] Golaha u soo gudbisey saddex Xeer oo muhiima oo ay gacanta ku heysay kuwaas oo kala ahaa:-

- **Xeerka Maareynta iyo Maamulka Maaliyada,**
- **Xeerka Hay'addaha Dakhliga iyo Cashuuraha iyo**
- **Xeerka Kastamada Somaliland.**

Saddexdaas Xeer oo ka mid ahaa 5tii Xeer ee PFM-ka, Gudiddu waxay Xeerarkaas u soo qabatey kulamo dadweyne (Meetings of Legislative Hearting) midkiiba socdey saddex cisho, ka dibna naaqish iyo isku soo habeyn wixii ka soo baxay waxay mid kasta warbixin lifaaqa Wax kabadalka iyo Kaabistoodu ku jirto ay u soo gudbisey Golaha oo ka horjeedisey Xeerkasta, iyadoo isla Kal-fadhigaas labada Xeer ee Kala ah Xeerka Hay'addaha Dakhliga iyo Cashuuraha iyo Xeerka Kastamada Goluhu ku ansixiyay isla Markaana Madaxweynaha uu u gudbiyay oo uu labaas Xeer Madaxweynuhuna Dhaqangaliyay.

Waxa kale oo Gudiddu Golaha u soo gudbisey ka dib markii ay ka soo tala-bixisay inuu Xilka Madaxweynuhu u magacaabey loo ansixiyo **Wasiirka Waraada Ganacsiga iyo Maal-gashiga Md. Xuseen Deyr.**

Gudidda Dhaqaaluhu waxay Golaha u soo gudbisey oo uga warbixisey laba xeer oo Gudiddu Gacanta ku heysay kuwaas oo kala ahaa:-

- Xeerka Maadhista Lacagaha (Money laundry bill)
- Xeerka Xawaaladaha (Remittance Bill)

## Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diinta

Gudiddu Golaha u soo gudbisey ka dib markii ay ka soo tala-bixisay inuu Xilka Madaxweynuhu u magacaabey loo ansixiyo **Gudoomiye ku-xigeenka Hay'adda Shaqaalaha Md. Maxamuud Cabdi Xarbi.**

**25/08/2016** waxay Gudidda Arrimaha Bulshada iyo Diintu kormeer ku tagtey Gobolka Awdal kormeerkaas oo ahaa xogogaal u noqoshada arrimaha Bulshada Gobolka gaar ahaan arrimaha caafimaadka iyo Waxbarashada waxay kulamo la yeesheen Maamulka Caafimaadka sida Gudomiyaha Cisbitaalka Boorama iyo Isuduwaha Gobolka ee Wasaarada Caafimaadka oo xog waramey xaalada caafimad ee Gobolka, caqabadaha ka jira iyo waxyaabaha loo baahan yahey in wax laga qabto, iyogoo booqdey qeybaha kala duwan ee cisbitaalka sida bukaan jiifka iyo goobaha adeega caafimaadka.

Sidoo kale waxay la kulmeen Gudoomiyaha Waxbarashada Gobolka Awdal oo isna xog ka siiyay Waxbarashada gobolka iyo halkey mareyso, sidoo kale waxyaabaha ka dhiman ee caqabada ku ah taabagalinta waxbarasho dhameystiran ee u baahan in wax laga qabto si ay warbixinteeda gudiddu ugu darsato waxayna su'aalo dhowra waydiiyeen Gudoomiyaha iyo maamulayaasha dugsiyada hoose iyo sare qaar ka mid ah oo booqasho ku tageen, waxayna gudiddu ka diraariysey warbixin waxyaabihii ay kala soo kulmeen Arrimaha Bulshada ee Gobolka Awdal.

## Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada

**02 Ilaa 31 March 2016** Waxay Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nagabgalyadu Booqasho ku tageen dhamaan Gobolada dalka, ujeedadda kormeerkaas oo aheyd khilaafka ka taagan Saami-qeybsiga kuraasta Golaha Wakiilada ee Gobolada dalka iyo Xeerkii lagu soo dooranayay Mudanayaasha Golaha Wakiilada, arrintaas oo ah mid taagan oo Gobol kasta doonayo inuu helo kuraas ka badan tirada iminka u fadhida, waxa kale ka mid ahaa ujeedada kormeerka kootada Haweenka iyo Dadka laga tirade badan yahey (Minority Groups)

Gudiddu waxay kormeerka ka bilowdey Gobolka Awdal waxayna kulamo la yeelatey Madax-dhaqameedka iyo Odayaasha Gobolka Awdal, qeybaha kala duwan ee Bulshada oo Haweenku ugu horeeyo iyo Dadka laga tirade badan yahey, intaa ka dibna iyagoo kormeerkooda sii wata waxay tageen Gobolka Tog-dheer, Gobolka Sool, Gobolka Sanaag iyo Gobolka Saaxil iyagoo la kulmayay gobolkasta Sidii Gobolka Awdal qeybahaa kala duwan ee Dadka Gobol kasta ku dhaqan.

Waxayna Gudiddu booqashada iyo kulamada ay la yeelaney Gobolada dalka ku soo gabo-gabeeyeen Gobolka Maroodi-jeex ee ah Caasimada Hargeysa iyagoo laba cisho kulamo la kala yeelatey Madaxdhaqameedka, Waxgaradka, aqoonyahanka, Haweenka, Dadka laga tirada badan yahey iyo Ururada Arrimaha Bulshada.

**18/02/2016** Shir-gudoonka iyo Guddida Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada ee Golaha Wakiiladu waxay Xafiiska Gudidda Arrimaha Gudaha kula yeesheen Ha'yaddaha SAFERWORLD. SONSAF, ADP, Komishanka Doorashooyinka Qaranka, kulan kan oo u jeedadiisu ahay in laysla eego sidii loo bilaabi lahaa hawsha Xeerka doorashada golaha wakiilada oo ay Guddidu Gacanta Ku hayso, kasoo dhawaan guddudi safari ugu bixi doonto gobolada oodhan.

Kulankan oo uu Gudoominaayey Gudoomiye ku xigeenka koowaad ee golaha Baashe Maxamed Faarax waxa kale oo kulan ku wehelinayay Gudoomiye ku xigeenka Guddida mudane Bashiir Xuseen Tukaake, mudane: Cali Xaaji Maxamed, Md. C/laahi Xuseen Cige, Md. Xaashi Xuseen Caabi. Xoog-haya Golaha Wakiilada, Mudane C/risaaq Siiciid Ayaanle.

Dhinaca Haayada waxa ka kala socday SAFERworld, C/jaliil Daahir, Marjome Walla, Olie Chevreew, Moses Owuor, SONSAF: Maxamed Axmed iyo Mustafe Sacad, ADP, Maxamed Faarax, NEC. Xasan Faarax,

Kulan oo loo balansanaa in guddida iyo hayadaasi ay isla eegaan sida loo bilaabayo hawsha iyo wakhtiga la bilaabayo, ayaa Gudoomiye ku xigeenka Golaha wakiiladu uu ka war bixiyay muhiimada uu leeyahay xeerkan iyo sida loogu baahan in sida u dhakhsaha badan loo galo gudiduna ay diyaar u yihin sidi ay hawsha u soo dhamaystiri lahaayeen kalfa dhigan soo socdana loo so hor dhigi laha golaha, kaliya ay u baahan yihiin in laga taageero kharashka hawsha ku baxa.

Geesta kale Masuulkii ka socday Haay'adaha waxay sheegen inay diyaar u yihin inay ka cawiyaan kharakhka ku baxaya hawsha oo ayna u hayaan diyaarna u yihiin in sida u dhakhsaha badan loo bilaabi hawhsa xeerka.

Gabagabadii kulankan waxa lasyku afgartay in hasha la bilaabo todobaadka soo socda, gudiduna ay diyaariso jadwalki ay hasha ku fulin lahay, sabtida soo socotana ay kulanka kale iskugu soo noqdaan Guddida iyo haayadahani oo ay jadwalka iyo bilowga hawshaba dhameeyan.

**13 June 2016**Gudiddu Golaha u soo gudbisey ka dib markii ay ka soo tala-bixisay inuu Xilalka Madaxweynuhu u magacaabey loo ansixiyo Masuuliyiinta kala ah:-

- Wasiir ku-xigeenka Wasaarada Gaashaandhiga**Md. Maxamuud Jaamac Warsame**

- Wasiir ku-xigeenka Amniga ee Wasaarada Arrimaha Gudaha **Md. Maxamuud Muuse Diiriye.**

**17/07/2017** Waxaa Dalka Kenya Caasimadiisa Nairobi safar ugu Baxay Mudanayaal ka tirsan Gudidda Arrimaha Gudaha iyo Nabadgalyada, safarkaas oo qaatey mudo 7 cisho ah waxaa ujeedada ay u tageen aheyd arrin la xidhiidha Xeerka ka-hortaga Argagixisada oo Gudiddaas gacanta ku heyso, waxayna kala ahaayen Mudanayaashu Md. Bashiir Xusen Tukale oo Gudidda hogaaminayay, Md. Maxamud Jaamac Cilmi (Dable), Md. C/qaadir X. Ismaciil Jirde, Md. C/laahi Xusen Cige (Blacky) iyo Md. Xaashi Xusen Caabi iyo La-taliyaha sharciga Mr. Mustafe Maxamed X. Daahir iyo Xogheynta Gudidda Mr. C/raxman Jaamac Nuur iyo sidoo kale u qaabilsanaha Baarlmaanada ee Hay'adda UNDP Mr. Mascuud.

Waxaa Guddida si diiran loogu soo dhaweeyay Aqalka Baarlamaanka Dalka Kiiniya oo lagu Casuumay kulan qado sharafna loogu sameeyay baarlamaanka gudihiisa, Madaxdii ay la kulantay Guddidu waxa horkacayay Guddoomiye ku-xigeenka aqalka sare ee Baarlamaanka Kenya **Senator. Kembi-Gitura**iyo Guddoomiye Ku xigeenka Guddida Nabadgalyada **Sen.Fatuma Adan Dullo iyo Xildhibaan Aadan bare Shiil**.

## Gudidda Arr. Dibada, Is. Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranka

GudiddaArimaha Dibeda, Iskaashiga Caalamiga ah iyo Qorsheynta Qaranku waxay kulan la yeelatey Taariikhdu Markey ahey **25/05/2016**Wasiirka Wasaarada Arimaha dibeda Somaliland Md. Sacad Cali Shire, iyadoo kulanka uu Gudoominayay Gudoomiyaha Gudidda Md. Axmed Cabdi Nuur Kijaandhe waxaana goob joog ka ahaa Md. C/laahi Madar, Md. Xaamud Cismaan Cigaal iyo Md. Cabdicasiis Ismaciil Ducaale oo dhamaantood ka tirsan gudidan.

Wasiirka Wasaarada Arimaha Dibeda Mudane Sacad Cali shire ayaa gudida si faahfaahsan ugaga waramay xaalada guud ee siyaasada Arimaha dibeda Dalku halka ay marayso gaaar ahaana waxa uu si qotodheer gudida warbixin uga siiyayXidhiidhka wadamada jaarka ah iyo kan mandaqada aynu ka midka nahay la leenahey.

Wasiirka ayaa waxa kale oo uu Gudidda u sheegay sida ay u socdaan wada hadalada Somaliland iyo dalkii aynu ka tirsanaan jirnay ee Somaliya iyo halka ay hada marayaan, waxasidoo kale uu wasiirku u faahfaahiyey heshiiska Dawlada Somaliland la gashay shirkada DUBAI PORT (DP) ee ku saabsan balaadhinta Dekeda Berbera taas oo uu ku nuuxnuuxsaday faa'iidada ay dalka u leedahay iyo rajada ay dhawaan qabaa.

Gudiddu Golaha u soo gudbisey ka dib markii ay ka soo tala-bixisay inuu Xilka Madaxweynuhu u magacaabey loo ansixiyo **Wasiiru Dawlaha Wasaarada Qorsheynta Qaranka Md. Maxamuud Jaamac Aadan Galaal.**

## Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka Hantida Qaranka

